Degmada Oslo
**Waaxda caafimaadka**
Qaybta daryeelka iyo caafimaadka dadka

1. ***Ka diyaargarawga halista nukliyeerka iyo qaybinta kiniinika aayodhiinka (jodtabletter)***

## *Warbixin ku socota shaqaalaha iyo waalidiinta iskuulada, xannaanooyinka, hay´adaha hoos taga waaxda qoysaska iyo carruuraha iyo xarumaha kale ee carruuruhu tagaan maalintii*

Qaadashada kiniinka aayodhiinka ama Jodtablett-ka waxaa lagaga hortegi karaa halista ka dhalan karta shilalka nukliyeerka Norway meel kasta. Qaaradda Yurub Xarumaha nukliyeerku way sii duugoobayaan sidaa darteed khatarta ka iman karta haddii shil ka dhacaana way sii kordhaysaa. Maraakiibta ku shaqaysa tamarta nukliyeerka ee ag marta xeebaha Norway way sii badanaysaa. Shil ku dhaca mid ka mida maraakiibtaa ama ficil argagixiso oo lala beegsadaa waxay iyana sababi kartaa in shucaaca noolaha khatarta ku ah ee la yiraa radioaktive-ka uu faafo oo dadka iyo noolaha kaleba aafeeyo.

Haddaba si looga diyaargaroobo halista nukliyeerka waxaa degmada Oslo ku diyaarisay dhammaan iskuullada (kuwa dawladda iyo kuwa baraayfadkaba), xannaanooyinka, xarumaha hoos taga waaxda qoysaska iyo carruuraha iyo dhammaan xarumaha kale ee carruuro ku sugnaan karaan maalintii kiniinka aayodhiinka (jodtabletter). Si markaa haddii shil nukliyeer uu dhaco carruuraha isla meesha ay ku sugan yihiin loogu qaybiyo kinniinka ka hortagga aafada nulliyeerka ee aayodhiinka (jodtabletter).

Haddaba waa lagamamaarmaan in iskuullada, xannaanooyinka iyo xarumaha kale ee carruuraha la geeya ay haystaan oggolaasho waalid ka hor intaan shil noocan ahi dhicin si carruuraha ay hayaan ugu qaybin karaan kiniinka aayodhiinka (jodtabletter).

Dhammaan carruuraha ku sugan dugsiyada sare iyaga waa loo qaybiyaa kiniinka aayodhiinka (jodtabletter) haddii shil nukliyeer uu dhaco.

Dadka aan kiniinkan guryaha ku haysan waxaa lagula talinayaa in ay soo iibsadaaan, resiidh la´aan ayaa lagaga soo iibsan karaa farmashiiyayaasha. Waxaa kale oo haddii shil noocan ahi dhaco laga doonan karaa kiniinkan xarumaha gargaraarka degdegga (legevakten).

Hay´adda dawladda ee qaabilsa ilaalinta tayada daawooyinka ayy sannadkiiba mar tijaabisa tayada kiniinka aayodhiinka(Jodtablettene) ee yaalla iskuullada, xannaanooyinka iyo xarumaha kaleba. Kiniinkan waa la isticmaali karaa wuuna shaqaynayaa xataa kadib taariikhda uu dhacayo. Laakiin marka tijaabo ka dib la ogaado in tayadiisu hoos u dhacday waa in la beddelaa.

**Helseetaten**
Folkehelse- og omsorgsavdelingen
Besøksadresse:
Storgata 51

Postadresse:
Postboks 4716
0506 OSLO
E-post:
postmottak@hel.oslo.kommune.no

Telefon: 21 80 21 80
www.oslo.kommune.no

Bankgiro: 1315 01 01659
Org.nr: 997 506 499

### *Dadka loogu talagaly in ay qaataan kiniinkan*

Dadka loogu talagalay kiniinkan waa carruuraha iyo dhallinta aan gaadhin 18 sano, hooyooyinka uurka leh iyo kuwa nuujinaya ilmo. Kuwaas ayaa ugu baahi badan kiniinkan. Talooyin gaara ayaa la soo jeediyaa xaaladaha qaar haddii loo baahdo in dadka u dhexeeya 18 illaa 40 sano iyana ay qaataan kiniinkan, eeg qaybta iskaa u diyaargarowga (egenberedskap)

### *Sida loo isticmaalo kiniinka aayodhiinka (jodtabletter)*

Marka qofka uu galo shucaaca radioaktive-ka waxa uu khatar u yahay in cudurka kansarka uu kaga dhaco qanjidhka hormoonada ee cunaha Thyroid-ka ama (skjoldbruskkjertelen). Markaa haddii uu dhaco shil nukliyeer oo sababa in hawada uu ku faafo shucaaca radioaktive-ka waxaa markaa kiniinka aayodhiinka (jodtabletter) uu qofka ka difaaci kartaa in uu galo shucaaca radioaktive-ka kadibna uu ku noqdo cudurka kansarka. Qaadashada kiniinkani waxay ka mid tahay hababka ay dawladdu ugu talagashay ka diyaargarowga aafooyinka nukliyeerka.

Kiniinka aayodhiinka(Jodtabletter) waxa keliya ee lagaga hortegi karaa shucaaca nooca jod-radioaktifka, noocyada shucaacyada kale kiniinkani waxba kama taro. Kiniinka waxaa la qaadanayaa sida ugu dhakhsaha badan marka agaasinka ka hortagga aafooyinka nukliyeerka ay dadka ku wargeliyaan, ama 4 saacadood gudahood marka la ogaado in shucaaca nooca jod-radioaktifka ahi uu la fal galay hawada, cuntada iyo biyaha/dareeraha.

### *Iskaa u diyaargaroobid*

Kiniinka aayodhiinka (jodtabletter) resiidh la´aan ayaa farmasiiyayaasha lagaga iibsan karaa. Waxaanu soo jeedinaynaa in faamiliyada haysta carruur iyo dhallinta ka yar 18 sano, hooyo uur leh ama nuujisa iyo dadka ay da´doodu ka yartahay 40 sano ay soo iibsadaaan kiniinkan oo guryaha dhigtaan.

### *Oggolaasho bixin*

Iskuullada, xannaanooyinka iyo xarumaha kale ee carruuruhu tagaan/lagu hayo maalintii waxa keliya oo ay kiniinkan carruuraha u qaybin karaan marka ay waalidiinta ka haystaan oggolaasho buuxa.

### *Digniinaha iyo sharciyada ka taxadirka isticmaalka kiniinkan*

- Khatarta iyo waxyeellada uu ku keeni karo kaniinkani carruuraha iyo dhallinta aad ayay u yar tahay
- Dumarka uurka leh iyo kuwa nuujiyaa waa in aanay qaadan in ka badan inta loogu talagalay
- Sharciyo gaara ayaa ka yaal siinta kinninkan ilmaha markaa dhasha (bisha ugu horaysa)

- Dadka uu buko qanjidhka hormoonada (thyreditt), ama aanu sidii la rabay u shaqaynayn amaba qaba xanuun maqaarka (dermatitis herpetiformis/Duhrings sykdom) waa in aanay qaadan kiniinkan
- Dadka xasaasiga ku ah maaddada kaliumjodid iyo maaddooyinka kale kaniinkani ka samaysan yahay waa in aanay qaadan kiniinkan
- Dadka laga qalay/jaray qanjidhka qaabilsan hormoonada (skjoldbruskkjertlen) uma baahna in ay qaataan kaniinka aayodhiinka (jodtabletter)

### *Haddii ay dhacdo dhibaato nukliyeer(atomhendelse)*

Ka xerood debedda kaninka aayodhiinka (jodtabletter)kana qaado, la soco internettka, tv-yada iyo raadyaha. Kiniinka aayodhiinka (jodtabletter) waxa uun la qaadan karaa marka dadka lagu wargeliyo.

### *Internett-bogyada muhiimka ah*

Bogga internettka ee degmada Oslo:
https://www.oslo.kommune.no
Bogga internettka ee Agaasinka ka badbaadista waxyeellada shucaaca nukliyeerka:
https://www.dsa.no/atomberedskap